# Cabdillaahi Yuusuf Axmed: habaarqabihii saddexaad ee Soomaali ka kaca

**I. Hordhac:**

Ina Cabdalla Xasan moojee, Soomaali saddex hoggaamiyaa soo maray. Kuwaasi oo kala ahaa *Aadan Cabdulle Cismaan, C/rashiid Cali Sharmaarke, iyo Maxamed Siyaad Barre*. Labada hore, in kastoon lagu tilmaamikarin ducaqabayaal, haddana, intii ay dalka ka talinayeen dhibaatooyin ma dhicin. Wax lagu ammaano oo la taaban karo may qaban, hayeeshee, midkoodna wax madaxnimajacayl ah ama kursi-isku-dhejin ah muu muujin. *Aadan Cadde* si sharaf leh buu taliskii u wareejiyey kolkii laga reeyey. Cabdirashiid wuxuu yeelilaaba laguma simin oo qudhiisii baabu kuwaayey.

**Aadan Cadde**

**C.C.Sharmaarke**

Labada kale ummadda way dhibeen waxaanay ahaayeen habaarqabayaal. Ka hore wuxuu dhaqdhaqaaqiisii bilaabay 1901dii. Waxaanu socday ilaa 1920kii. 48 sano kadib habaarqabe kalaa oogsadey oo loo sacabbatumay. Isna intii in leeg buu dadka soo dhibay. Bishii hore tobankeedii hoggaamiye kalaa meel cidla' ah loogu cumaamaday. Waxaannu haddaba si dhab ah uga warramaynaa sidii ay labadaa habaarqabe ee hore ummadda Soomaaliyeed u dhibeen, sidii ka hore loogu tilmaamay halyeeyga, ka dambana loola damacsanyahay in Xamar taallo looga taago. Waxa kale oon sheegidoonaa falaadxumidoodii iyo sidii ay ujabeen. Waxan si gaar ah u muujindoonaa meelaha uu hoggaamiyaha cusubi uga egyahay kuwii hore. Waxanan oddorosidoonaa sida tubta uu hayaa u tahay tii ay kuwii hore ku jabeen. Gebagebada waxan ka hadlidoonaa waxa soomaali la gudboon si looga badbaado dhibaatooyinka uu soo wado Habaarqabahan cusubi.

**II. Habaarqabihii 1aad:**

*Habaarqabe Maxamed C. Xasan*

Sida lagu sheegey buugga la yidhaa: *taariikhdii daraawiishta* iyo Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, wuxuu *Ina Cabdalla Xasan* markii u horreysey ka soo degey dekedda magaalada Berbera isaga oo cabsan aragtida nin *Soodaaniya* oo la odhan-jirey **Sh. Maxamed Saalax**. Wax yar kadib, dardar cusub oo ku salaysan abaabul iyo fidinta dariiqadii uu la yimid buu Berbera ka bilaabay. Markii farraarro hangool layskaga qabtay wixii uu wateyna dheg loo jalaqsiinwaayey, wuxuu u dhalandhoolay dhanka iyo carro Dhulbahante oo reer abtigiis ahaa.

Dabayaaqadii 1897kii ayuu wadaadku Berbera ka ambabaxay. Intii uu dhexda ku siijirey, wuxuu sii maray meesha la yidhaa Dhaymoole. Halkaasi oo uu kula kulmay carruur Soomaaliyeed oo ku jirtay dugsi Baadderi Faransiis ihi lahaa, taasi ayaana beddeshey baaqii hore ee uu Berbera kaga tiraabi jirey. Kolkii uu dhextegey reer abtigiina baaq cusub oo horleh ayuu kula dhexdhacay. Baaqaasi oo ahaa in gaalada lala dagaallamo diintana kor loo qaado. Runtii dadweynihii jiiddaasi degenaa si xoog leh ayey ugu guuxeen aragtidaa. Taageero xoog ah oo hiil iyo hooba lehna way la garab galeen.

In kasta oo uu Sheekh sheeganayey haddana falalkiisu waxay ka marag kacayeen inuu ahaa nin ku danaysta diinta. Waxana ka mid ah falalkii lala yaabbanaa:

a. **Dagaalkii u horreeyey uu Soomaali ku qaaday:**

Kolkii uu xoogeystey, taageero weyna uu helay, ayuu abaabulay dagaalkiisii u horeeyey. Dagaalkaasi waxa la filayey inuu ku qaado fadhiisannadii ciidammadii Ingiriiska. Hayeeshee, illeyn nin meeli u cadday meeli ka madowe, wuxu dagaalkii u jiheeyey in Soomaali lagu qaado. Bishii juun 1900kii baa colkii daraawiishta ooy culmo xooglihi hoggaamineysaa weerar ku qaaday beelo Soomaaliyeed oo markaa deggenaa jiidda u dhaxaysa Hargeysa iyo Oodweyne (Jaamac Cumar Ciise 1976). Weerarkaas oo lagu qaaday beelo Isaaq ah waxa laga soo dhacay 2000 oo halaad. Weerarkaana waxa la odhanjirey sida buuggaasi lagu sheegey Dayax weerar.

Dadku kala dareen badan kalana il dheere, rag daraawiishta ku jirey baa ka yaabay sida ay isu burinayaan baaqii wadaadka iyo falalkii uu ku kacayey. Raggaas waxa ka mid ahaa Sheekha la odhan jirey *Shariif Cabdulle Shariif Cumar* (Jaamac Cumar Ciise 1976). Markii baaqii Sheekhu isu beddeley in reero Soomaaliyeed la mooraduugo ayuu Shariifku mariyey geeraarkan:

*Col Ashraafi wacaysiyo*
*Caalin reero dhacaaya*
*Cilmi geel lagu qaado*
*Sayidkii Calmanaayaw*
*Cimri yuu ku simaayoo*
*Cidhibteeda ogaada?*

**b. Anshaxumadii wadaadka:**

Sidii ay baaqiisa iyo falkiisu isu buriyeen ayey falaadkiisa iyo ladhkiisuna isu maax-duminjireen. Sheekh caalin ah ayuu sheektay, falaad wabiinna wuu lahaa. Sheekh inuu caytamaa waa arrin af ka weyn. Ninka Sayid ama Sheekh isku magacaabijirey, tolkiina halyeynimo u caleemasaareen, waa ninkii ugu aflagaaddo iyo anshax xumaa intii Soomaaliyi soo jirtey. Tusaale ahaan, gabay u tiriyey ***Caasha Keenaddiid*** oo ***ahayd Boqor Cismaan Keenaddiid*** walaashii waad ka matagaysaa, mana odhankartid qof diin iyo dadnimo leh baa tirshey. Haddii aad moodeyso, akhriste, in wadaadka la nabayo ku soo dhowow wixii afkiisa ka soobbaxay:

*NIMANYOHOW SI DARAN BAA QALBIGU II SADDIYAAYE*
*SIRQADII UU DHALAY KEENADIID SAWDKA LAGA EENAY*
*IYO SILICA AY TAHAY DHILLADU WAA SI KALA DHEERE*
*SAADADA INTAY CAAYI IYO SUBACYADII DIINTA*
*INTAY NIMAKA SAALIXIYADA SARE U KEENEYSO*
*SIBIISHEEDA AY KALA WADHWADHI SACABKA MAY SAAR TO*
*SUYUCEEDA URI BAA WADNUHU NALA SUREERAAYE*
*SUNNAADHEEDA WAA LAGU BAKHTIYI MADAX SANBIILLEEYE*
*SANKA WAXA IGA GALAY DOORADAY NAGU SAMMUUTAYNNE*
*SIILKEEDAA SAAXAHA KA WEYN SINA QABAALLEEYE*
*WAXAY UGU SAFTAAN SIDII HORWEYN KAALIN LOO SIMAYE*
*SODDON DOWLIS BAA LAGU SHUBAA SAACAD IYO LEYLE*
*ILKO SURUQA BAY LEEDIHIYO FOOLAL SAAWIRAHE*
*SANBAB WEEYE CEEDHIN AFKII SUULIGA AHAAYE*
*SULLANKEED LA NAAR WAA WAXAY SABUHU DHUUQAANE*

*WAXA SAARTA SOOMAALIDII SAARUQA AHAYDE*
*SARKAALKIYO SUBEYDAARADA IYO SOWJARKAA KUDA E*

*MAXAAN SIIL QADHMUUN KALA HADLAA WAABA SAANIYADE !!*

Reero badan ayuu wadar ahaan u caayey. Tusaale ahaan isaga oo Majeerteen caayaya wuxuu yidhi:

*MAGANNIMO ALLAA LEHE NIMANKAAN MUSKOWGALAY*
*AAN MEHERBA LAGU DHALIN MINADOOD HA GUBATEE*

Falaadxumada faraha badan ee ***Ina Cabdalla Xasan*** waxa si layaab leh oo kooban u tilmaamay ***Cali Jaamac Haabiil***. Waxaanu yidhi:

*TALADII ILAAHAY KA QAAD TUUGGII REER XAMARE*
*TACABKII BA'A WAA SIDA FIRCOON TAB IYO XEESHIIYE*
*SAFAR WAA LA TAAKULIN JIREE LAMA TAKLIIFEYNE*
*ISNA TURUQYADUUN BUU JARAA TIMIRTA RIIXDAAYE*
*TAAG NIMAAN LAHAYN IYO AGOON BUU KA TAAJIREYE*
*KUN TAWXIIDSANAAYUU SIDII TAYS U GAWRACAYE*
*TODDOBUU QABAA NAAGO XOR AH TUU FALAA DARANE*
*MA TALYAANIGAASAA MAHDIYA TANINA WAA YAABE*

**c. Dhiigyacabnimadii Ina Cabdalla Xasan:**

Sheekhnimadii intuu ka xuubsiibtey buu Ina Cabdalla Xasan dhiigyacab dilaa ah isu rogey. In kasta oo aan halkan lagu soo koobi karin falalka dilka ah ee uu ku kacay, waxaan isku deyi inaan dhawr ka tilmaamo:

**1. Dilkii ilma Cabdulle Maxamed Shixiri:**

Kolkii dhibtiisii laga fadhiyikariwaayey ayey culimadii dariiqada Qaaddiraya u ashtakoodeen ***Sheekh Maxamed Saalax*** oo ahaa Sheekhii uu aragtidiisa ku adeeganayey. Ninka la odhanjirey **Cabdulle Maxamed Shixiri** oo Isaaq ahaa isagana uga wakiil ahaa magaalada Cadan ayaa ka hor yimid oo ku markhaati furay inuu wadaadku falal gef ah ku kacay. Kolkii uu ogaaday inuu wakiilkiisi ku markhaati furay ayuu toddoba wiil oo uu dhalay oo Xarunta Daraawiishta deggenaa dhegta dhiigga u daray. Midhkaa isaga Ina Cabdalla Xasan tilmaamaya wuxuu yidhi:

*ARKI MEYSID INA SHIXIRIYOW INNAMADAADIIYE*
*ADIGUNA AMXAAR BAAD TIHIYO EHEL NIJAASEEDE!*

**2. Dilkii Sheekh Uweys Maxamed Al-Baraawi:**

Waa yaabe, markale isagaa isku marag furay inuu gacantiisa ku diley Sh. Uweys oo ahaa hoggaamiyihii dariiqada Qaaddiriya ee Koonfurtii hore ee Soomaaliya. Waxaanu gabay ku yidhi :

*DOQON BAAN OGEYN SUUDIYOW DAHAYA NAA REEDE*
*WUXUU DOOKHANNEEYOO XUMAAN DELI LA MEERAAB*
*DEMBIGUU FALAAYAA UWEYS LOOGU DAW GALAYE*
*CANDHO-DOGOBLE GOORTAAN DILAA ROOBKU NOO DA'AYE*

**d. Taalladii loo taagey iyo ciddii ka danbeysey:**

Markii lays yidhi la illoow taariikhdii, reerkii uu ka soo jeedeyna maamulkii gacanta ku dhigay, ayaa la dambabasey dhibaatadii iyo wixii gef iyo godob uu Soomaali ka galay. Halkii ay dadku ‘Habaarqabe’ uga haysteen waxa laga dhigey ‘Haleyey’ Soomaalinnimo u soo dagaalgalay. Buugaagtii laga qoray waa la majarahabaabiyey. Wax aanu ahayn baana laga dhigey. Gabayadii uu ku caytamay oo ceebtiisa soo bandhigeysey laguma soo darin buuggii ‘Diiwaanka gabayadii Ina Cabdalla Xasan.’ Waxa ka mid ah

gabayada lagu soo darin ka kor ku xusan ee uu Caasha Keenadii u tiriyey iyo qaar kale oo badan. Dadka wax ka qoray dhammaantood waa la reer. Tusaale ahaan, Prof. Siciid Sh. Samatar, Dr. Cabdi Sh. Cabdi, iyo Axmed Faarax Cali "Idaajaa" oo dhammaantood la reer ah. Haddii uu ahaa nin Soomaalijecel ama ay Soomaaliyi jeclayd waxa wax ka qorilahaa dad aan la reer ahayn.

**III. Habaarqabahii 2aad:**

*Habaarqabe M. Siyaad Barre*

2lkii Oktoobar ee 1969kii Habaarqabe kale baa Soomaali ka kacay. Habeenkaas ciidan uu horkacayo Maxamed Siyaad Barre ayaa maamulkii dalka ka jirey afgembi ku qabsaday.

Dadka oo runtii aad uga niyad jabsanaa maammulkii rayidka ahaa ayaa si la yaab leh u soodhoweeyey ayagoo ku rajo qabey iney keeni doonaan isbeddel dhinac walba ah. Sidii habaarqabihii hore ayuu isna aragti aanu lahayn la shiryimid. Aragtidaasi oo ahayd hantiwadaag. Wax yar uu ka bawsaday baanu doonay inuu dalka iyo dadkaba ku maamulo. Sidii habaarqabihii hore markii uu ogaaday in aad loo taageersanyahay ayuu isna guurey geeddiyo gurracan waxana ka mid ahaa:

**a. Gubiddii hudheelkii Jubba:**

Tallaabadii u horreysey ee uu qaaday waxay noqotay in la gubo ***Hudheelkii Jubba*** oo ahaa hanti dadweyne. Si dadka loo soofdaran habaabiyo waxa falkaas lagu eedeeyey nacab aan jirin. Dad badan baa markiiba candhuuftooda dib uga liqay oo yidhi, "Waaba la ogaan wuxu soo wado!"

**b. Dilkii Caynaashe, Dheel iyo Gabayre:**

Geeddigii labaad wuxuu noqday inuu dilo madax Soomaaliyeed. 1971kii waxa dil lagu xukumay saddex sarkaal oo kala ahaa: *Janaral Maxamed Caynaanshe Guuleed, G/dhexe Salaad Gabayre iyo G/dhexe Cabdulqaadir Dheel. Raggaas w*axa lagu eedeeyey iney kacaanka mijaxaabinayeen.

**c. Dilkii wadaaddada:**

Geeddigii uu eedey wuxu guurey 1975kii. Waa markii uu dadweynaha Soomaaliyeed iyo Ummadda Muslinka guud ahaanba la horyimid inuu saxayo Quraanka Eebbe. Waxaanu sheegey inuu tirtirayo xeerkii Shareecada Islaamka ee ku saabsanaa xuquuqda ragga iyo dumarka waxaanu ku dhawaaqay iney siman yihiin eenu arinu aheyn sida Ilaahay(S.W) suuratul Nisaa ku sheegay. Culimadii diinta ayaa ku kacday oo aragtidaasi ku gacansaydhay. Maalintaasi wadaaddo farabadan baa jeelka loo taxaabay. Qaar ka mid ahna waxa lagu xukumay dil. Sheekhayadii la dilay waxa ka mid ahaa Alla ha u naxariisto dhammaantoode kuwan hoos ku xusan:

1. Sh. Axmed Sh. Maxamed
2. Cali Axmed Warsame
3. Xasan Cabsiiye Diiriye
4. Sheekh Axmed Iimaan
5. Sheekh Muuse Yuusuf
6. Maxamuud Siyaad Xirsi
7. Cali Jaamac Xirsi
8. Aadan Cali Xirsi
9. Suleymaan Jaamac Maxamed

10. Yaasiin Cilmi Caw!

Inkaartii culimadu may soodhixine, kolkii laga soo dareeray dilkoodiiba laba dayuuradood oo Miig ah oo ay ciidamadii Soomaaliyeed lahaayeen baa isku dhacay. Dad badan baana meeshii ku geeriyoodey.

**c. Dagaalkii sokeeye iyo burburkii magaalooyinka:**

Maantaas laga bilaabo, Afweyne geeddi toosanba dib uma guurin. Maalinba meel uun buu ku habsan jirey oo ciidankiisii duldhigijirey. Markii uu inkaar qabe Cabdillaahi Yuusuf isku deyey afgenbiga Majeerteen baa eedey. Dad iyo duunyaba wuu mooraduugey. Falkaasna sas buu ka qaaday. Ciddii samafal ku kacda wuxuu u arki jirey iney shirqool u dhigayaan. Tusaale ahaan dhallintii reer Hargeysa kuna caan baxday "Hargeisa Group"ee rabtay iney dadkooda iyo dalkooda kaaliso wuxuu u arkay iney maaxduminayeen, waxana lagu xukumay dil, xabsi daayin, iwm.

Intii ay arrinta dhallintaasi socotay odayaal farabadan baa ergo ahaan ugu tegey kana codsaday inaanu arrinta fogeyn oo uu siiddaayo. Waanu u ballanqaaday. Sow wadaadku weligiiba ballan ma fulin. Dhallintaasi oo ay ka mid ahaayeen kuwan hoos ku qorani halkii ay ka sugayeen in la sii daayo waxa loo taxaabay Labaatanjirow.

Dr. Maxamuud Cali Sulub
Cumar Ciise Cawaale
Cali Cige Faarax
Maxamed Macallin Cabdi
Axmed Muxumed Madar
Maxamuud Cabdi Jiciir
Xuseen Maxamed Ducaale (Berberaawi)
Cabdillaahi Cali Yuusuf (Colaad)
Yuyusuf Cadillaahi Kaahin (Ina Geydh)
Cabdiraxmaan Cabdillaahi X. aadan (C/raxmaan Masalle)
Axmed Xuseen Caabbi
Dr. Aadan Yuusuf Abokor
Baashe Cabdi Yuusuf
Aadan Warsame Siciid
Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani
Dr. Osman Meygaag
Maxamed X. Maxamuud Cumar Xaashi
Maxamed Cali Ibraahim
Axmed Maxamed Yuusuf (Jabane)
Maxamed Baaruud Cali ( Ina Baaruud).

Tiyaatarkii Hargeysa

Hotel Curuba

Arrinkaa dhallinta si waayeelnimo umuu maarayn dhibaatadeediina waa tii dhalisay iska horimaadka. Ugu dambayntiina dagaalkii sokeeye ayaa halkii ka bilaabmay ilaa uu dalkii burburay sida ka muuqataa taswiiraha halkan ku xusan.

**III. A. Waxyaalaha ay labadaa Habaarqabe iskaga midka ahaayeen:**

Waxyaalo badan bay labadaa habaarqabe wadaagaan oo ay iskaga mid ahaayeen. Waxana ka mid ah:

a. Labaduba waxay ka tirsan yihiin dhalasho ahaa Daarood
b. Aragtiyo aanay lahayn bay labaduba adeegsadeen ( Islaam iyo hantiwadaag)
c. Waxay ku taamijireen sidii loo dhisilahaa Boqortooyo Daarood.

d. Labaduba way jabeen dalkana way ka carareen, debedna way ku Geeriyoodeen.
e. Gacan-ku-dhiiglayaal bay ahaayeen.
f. Waxa jebisey talaxumo.
g. Magac muslin bey wateen.
h. Reerka aad u taageeray, jabkoodiina xoogga ugu madhay waa Dhulbahante.

**B. Taallada la damacsanyahay in loo dhiso:**

Taariikhdii Maxamed Siyaad Barre cid qortay maan arag, mana maqal. Dhibaatadii uu geystey ayaa lagu mashquulay. Dadku sidee dhibtan looga baxaa mooyee sidee taariikhdiisii loo ururiyaa haabkaba kuma hayaan. Haddii la qoriwaayana sidii Ina Cabdalla Xasan ayuun baa la odhan halyeey Soomaali mideeyey buu ahaa. La odhanmaayo wuxuu ahaa ninkii Soomaali kala firdhiyey. Hadallada durba soo yeedhaya ee ka soo yeedhaya jifadiisa ayaad ka garanaysaa sida durba loogu sii qorshaynayo sidii taallo loogu taagi lahaa. Waxa dhegahaaga ku soo duulaya, "Waar isagaba wax dhaamay ma jiro! Haddii aan haddaba taariikhdiisii inta ay qoyantahay la ururin lana tilmaamin dhibaatooyinkii uu ummadda Soomaaliyeed baday, waxad arki iyada oo sidaa aan soo sheegey lagu tilmaamayo, taallana Xamar looga taagayo!

## IV. Habaarqabaha 3aad:

Cabdillaahi Yuusuf Axmed oo ah Madaxweynaha hadda cidlada looga soo cumaamaday dhawr arrimood buu kuwii hore uga egyahay. Taasaana kuu caddayneysa inuu yahay habaarqabiihii saddexaad ee Soomaali ka kaca. Taariikhdiisa waxba ka sheegimaayo waayo aad baa wax looga qoray. Qofkii doonaya inuu wax ka ogaadaa ha akhristo qoraalladii C/waaxid ee ku saabsanaa ninkan isaga ah. Hadal iyo dhammaantii, inuu habaarqabe kale yahay waxa kuugu daliil ah inta wax ee uu kuwii hore la wadaago. Waxana ka mid:

***Habaarqabe C. Y. A. (Cabdi-Xabashi)***

a. Cabdillaahi sidii labadii hore ayuu magac Islaam leeyahay. Cabdillaahi oo micnihiisu yahay Addoon Ilaahay, isagu waa addoon Xabashi. Magaciisana hadda wixii ka dambeeya waxan soo jeedin lahaa in loogu yeedho "Cabdi-Xabashi."

b. Cabdi-Xabashi labadii habaarqabe ee hore waa la reer, in kasta oo aanu la jifo ahayn, oo waa Daarood.

c. Ballan xumada Maxamed Siyaad Barre ayuu kala mid ahaa oo weligii ballan ma fulin. Sida qoraalkan hoose ku qoran wiilkii uu awowga u ahaa ee uu u diray inuu Suldan Axmed Hurre dilo wuu ku ballanfuray. Waxa kale oo marag madoon ah inuu shirkii Neyroobi rag badan ugu ballan qaaday inuu jagooyin u dhiibidoono. Markii uu ujeeddadiisii gaadhayna wuu kaga wada baxay.

d. Sidii Habaarqabayaashii hore ayuu gacankudhiigle yahay. In badan baan maqalney inuu dilay Alla ha u naxariistee Mujaahid Cabdiraxmaan Caydiid iyo Suldaan Axmed Hure. Warbixin laga soo diyaariyey arrintaasi dhowaan oo lagu soo faafiyey web-ka calaamaddiisu tahay: www.hobynet.com waatan hoos ku qorane aad ugu fiirso :

*"Warar lagu kalsoon yahay oo aan ka helay eheladii Suldaan Hurre ee ku nool dalka Ingiirska ayaa cadeeyey inay u gudbiyeen qarkeenkooda cajalado laga soo duubay dad goobjoogayaal ahaa oo ku sugnaa tuulada Kalabayr markii la dilayey Suldaan Axmed Hurre. Dadkaan ayaa cadaynaya sidii Suldaan Hurre loo diley.*

*Dhinaca kale gacan ku dhiiglaha Suldaanka xabada ku dhuftay oo la yiraahdo Gacamay Cabdi Caabi Yeey oo uu Col. C/Yusuf u yahay awoowe ayaa markii ugu horaysay sheegay in amarka uu ku dilay Suldaan Hurre ka soo baxay Col. C/Yusuf.*

*Cajaladahan cusub ayaa la filayaa in la horkeeni doono maxkamada London ka furmaysa bisha Janaury 14. 2005, ee laga sugayo inuu Col. C/Yusuf soo xaadiro si loo weydiiyo su'aalo ku saabsan dilkii Sudaan Hurre.*

*Xog-waranka gacanku diigle Gacamey Cabdi Caabi Yeey ayaa la sheegay inuu ka dambeeyey kadib markii uu jabiyey balantii Col. C/Yusuf uu horay ugu balan qaaday inuu gacan ku dhiigle Gacamey Cabdi Caabi Yeey uu dalka ka dhoofinayo.*
*Dhinaca kale odayaal iyo wax-garad ka tirsan beesha Maxamed Cumar ee Suldaan Axmed Hurre ka dhashay oo si qarsoodi ah ula kulmay gacan ku dhiiglaha ayaa u shegay inay iska cafiyaan, haddii uu sheego sida wax u dheceen sidaasna uu ku yeelay in laga duubo cajalad uu ku nuux-nuuxsaday inuu Col. C/Yusuf ku amray inuu soo dilo Suldaan Hurre. Cajaladan cusub ayaa sidoo kale waxaa ku jira Cali Xasan Islaan oo asagu ahaa ninkii baartay meydka Suldaan Hurre, kana furtay saacadii iyo taleefoonkiisii gacanta ayaa isna cafis ka dalbaday beesha Maxamed Cumar ee uu Suldaanku ka dhashay. Wuxuuna cadeeyey Cali Xasan Islaan inuu Col. C/Yusuf amray in lasoo dilo Suldaan Axmed Hurre.*

*Gacan-kudhiigle Gacamay Cabdi Caabi Yeey iyo Cali Xasan Islaan ayaa ka soo jeeda beesha Reer Mahad, kuwaas oo ay waliba isku jifo yihiin Col. C/Yusuf. Waxaana la filayaa inay dhabar-jab weyn ku noqoto Col. C/Yusuf marka maxkamadu furanto bilowga sanadka soo socda.*

*Waxaan halkaan indiinku soo gudbinay qoraalkii maxkamada Lodon ay soo saartay eek u saabsan dacwada loo haysto Col. C/Yusuf ee dilkii Sudaan Axmed Hurre. Suldaan Axmed Hurre ayaa ahaa nin haysta dhalashada dalka Ingiriiska. Waxaana dacwada wada xaaskiisii iyo caruurtiisii.*

*Bogga Koowaad Bogga Labaad*
***Dr. Cabdi-daahir Yusuf Cilmi***
***cabdidaahiryusuf@yahoo.co.uk"***

Markan sidii Ina Cabdalla Xasan isagaa isku qirayaa inuu dembiyo badan galay waxaanad nala eegtaa warbixintan laga soo diyaariyey markii uu dhawaan Makka tegey:

*"Sidaad la wada socotaan waxaa xaramka tagay ninka aan kor ku xusay ee ah korney C/hi/Yusuf asagoo damacsan in uu cumraysto nin aan aad iskugu wacanahay asagana ay qaraaba yihiin ayaa waxa uu waydiiyay waxa ku kalifay in asagoo da'daan ah uu cumraysto asagoo ay in badan suurta gal u ahayd in uu yimaado in badana uu xanuunsanaa oy u ekayd in uu mar hore yimaado bal akhri jawaabta uu bixiyay kornaylku, Umabaahan hada ka hor hadase waqti baan ku jiraa aan rabo in wixii hore ka mayrto iskuna diyaariyo arinka culus oo isugaya oo u baahan wax ka qabasho dagdag*

*ah iyo sidii loga nadiifin lahaa mooryaanta Xamar , Waa jawabtii korneylka, hadaba qof loo fasirayaa ma jiro ee akhrista kastaa ha qaadaa dhigo waxna ha ka qoro sida ay la tahay. (Abdirahman A.H- hobyonet.com)"*

e. Waana la Himilo labadii habaarqabe ee hore oo wuxuu si aad ah ugu taamayaa sidii uu u dhisilahaa boqortooyo Daarood.

f. Afxumada waa kala mid. Isaga oon is hubsan ayuu 61kii Xildhibaan ee Hawiye ee isaga doortay afxumidiisa ku yidhi midkiinna uma qalmo jagada 1aad.

g. Geeddi xun guurka: kolkii uu is hubsaday inuu taageero weyn helay ayuu ciidan uu dadka ku muquuniyo dalbaday. Dagaalkii u horreeyeyna wuxuu ku qaaday S/laand.

h. Diin nacaybka: Sidii habaarqabayaashii hore diin iyo wadaad lama tusi karo.

i. Sidii kuwii hore ayuu aragti aanu lahayn ku adeeganayaa, taasi oo ah inuu nin kasta oo gadhleh ama haweeney wal oo asturanba ku sheego inay ka mid yihiin Al-qaaciida.

j. Waxa hadda xoog u taageersan oo uu luggoynayaa Dhulbahante.

k. Naxariisdarrada: isaga oo og wixii ay dhibaato inoo geysteen ciidammadii huwanta ahaa ee uu Maraykanku horkacayey ayuu maanta yidhi ciidan shisheeye ah ha la ii keeno. Waxa xusuus innagaga filan taswiirtan oo tilmaamaysa sidii ay dadkeenna ugaleen ciidamadii shisheeye.

***Qof Soomaaliyeed oo Ciidamdii Beljamku Gubayaan***

***Marxuum*** Shidane Abukar Arone

Waxan hadalkayga ku soo gunaanadayaa ninka isaga oon waxba haysan ee cidlada jooga, isna ogaa inaan cidi doonahayn ee tallaabadii u horreysey ku codsaday ciidammo ajnabiya, weerarkii u horreeyeyna ku qaaday S/laand ma filayo inuu guuldarro mooyee uu guulo soo wado. Waxaana dadka Soomaaliyeed la gudboon iney ka hortagaan Habaarqabahaasi hadda kacaya, iskana kaashadaan sidii aanay ujeeddooyinkiisu ugu fulin. Ujeeddooyinkiisa waxa ugu horreeya Hawiye gawrac, Isaaqna ku xigsii,

Raxanweynna weyn isdhiibiye dabadeedna Boqortooyo Daarood taag. Haddii aan hadda la qaban sidii Ina Cabdalla Xasa baa meel dheer laga dooni. Dhulbahantana waxan odhan lahaa, walaalihiin ha ka raacina habaarqabe sidii kuwii hore idinku danaysanaya.